



Anagoo Wada shaqaynayna, Waan Yarayn Karnaa Khatarta Cuntada.


Nidaamyada biyaha qaada sida luuqyada, kanaallada, iyo togaga biyaha ee ku yaala Dhammaan Degmada san diego ayaa loo sameeyay si loo yareeyo daadadka dhismaha loona ilaaliyo badqabka iyo isticmaalka wadooyinka dadwaynaha ayadoo biyaha daadka ee dheeraadka ah lagu daraayo balida, webiyada, iyo badwaynta. Jaayga isku aruuray, beeraha iyo qashinka ee ku jira nidaamka biyo mareenka ayaa keeni kara in biyaha daadku soo laabtaan, taasoo keenaysa daadad. Sidaas awgeed, dayactir joogto ah ayaa muhiim ah si loo xaqiijiyo shaqada ugu wanaagsan.

Ayadoo ku xiran meesha ay ku yaalaan, nidaamyada daadka waxaa maamusha dawlada ama mulkiile dhisme gaar ah sida qofka degan guriga ama Ururka Mulkiileyaasha Guryaha (Homeowners Association, HOA). Waaxda Shaqada Dadwaynaha ee Ismaamulka (County's Department of Public Works, DPW) ayaa si joogto ah u abaabusha shaqaalaha ilaalinta bii'ada si loo nadiifiyo nidaamyada daadka ee degmadu maamusho ee ku yaala meelaha aan maamulku joogin ee Ismaamulka. Magaalooyinka maamulka leh ayaa ilaaliya nidaamyadooda daadka ee maamulkooda hoostaga. Nidaamyada daadka biyaha ee dawlada maamusho ayaa badanaa ku yaala gudaha wadooyinka iyo geesaha wadooyinka laakiin meelo kale ayaa jiri kara. Xogta ku qoran buuggaan xogta ayaa loogu talagalay inay gacan ka gaystaan go'aaminta in ilaalinta nidaamyada daadka ay tahay masuuliyad daaran mulkiilaha dhisme gaar ah ama wakaalad dawladeed.

Maxaad samayn kartaa?

- 1** Mulkiileyaasha guryaha ayaa laga codsanayaa inay la socdaan ayna nadiifiyaan nidaamyada daadka qaada ee guryahooda kahor xili roobaad kasta (Oktoobar-Abriil) iyo kadib dhacdooyinka daadka si loo yareeyo khatarta daadka biyaha.
- 2** Kala shaqee dariskaaga iyo/ama HOA nadiifinta nidamayada daadka ee gaarka loo leeyahay deegaankaaga.

Sida loo go'aansho haddii nidaamka daadku yahay Mid dawladeed ama Dad gaar ah:




Qaababka mulkiileyaasha guryuhu u go'aanshaan cida leh masuuliyada.


Qaababka loo go'aansho cidda masuuliyada leh.

Raadi Nidaamka Diiwaannada Xog Aruurinta ee Oonleenkaha

Degmada ayaa leh nidaam oonleenkaha oo u sahlaysa dadka deegaanka inay galaan naqshadaha degmada iyo qaab dhismeedkiisa. **Booqo srs.sandiegocounty.gov** kadibna guji Tipsheet, ama **wac (858) 694-3253** ama xog dheeraad ah oo ku aadan adeegsiga Nidaamka Diiwaannada Xog Aruurinta.



Gal bogga Sabar-loogada ee Qariirada ama Naqshada si aad **Xaqiiji in qiimaynta ay aqbashay Degmadu**. Waa macquul in qiimaynta nidaamka daadka lagu muujiyo khariirada laakiin aysan aqbalin Degmadu. Haddii bogga sabar-loogada ee diiwaanku sheegaaya in qiimaynta **LA DIIDAY**, mulkiilaha dhismaha ayaa masuul ka ah dayactirka nidaamka. (Waa lacag soo degsashada bogga qariiradaha iyo naqshaduhu.)



Calaamada CL = Laynka Dhexe

Luuqada aqbalaada ee caadiga ah:	Luuqada diidmada ee caadiga ah:
<p>I, _____, CLERK OF THE BOARD OF SUPERVISORS OF THE COUNTY OF SAN DIEGO, CERTIFY THAT SAID BOARD OF SUPERVISORS HAS APPROVED THIS MAP, HAS ACCEPTED ON BEHALF OF THE PUBLIC,</p> <p>FOR USE AS STREETS, TOGETHER WITH THE RIGHT TO EXTEND AND MAINTAIN DRAINAGE FACILITIES, EXCAVATION AND EMBANKMENT SLOPES BEYOND THE LIMITS OF SAID RIGHT-OF-WAY, ALL AS DEDICATED ON SAID MAP AND ACCEPTANCE INTO THE MAINTAINED SYSTEM IS SUBJECT TO IMPROVEMENT, AND HAS ACCEPTED ON BEHALF OF THE COUNTY, THE DRAINAGE EASEMENTS AND THE EASEMENTS FOR PEDESTRIAN AND EQUESTRIAN TRAIL PURPOSES, ALL AS DEDICATED ON SAID MAP, AND HAS ACCEPTED ON BEHALF OF THE COUNTY, THE CLEAR SPACE EASEMENT, ALL AS GRANTED ON SAID MAP.</p>	<p>I, _____, Clerk of the Board of Supervisors of the County of San Diego, hereby certify that said Board of Supervisors has approved this map; has accepted on behalf of the public</p> <p>and the sewer easements, as dedicated on said map, and has rejected on behalf of the public the drainage easements offered for dedication on said map. (NOTE: Section 11616 of the Business and Professions Code of the State of California provides that a rejected offer of dedication shall remain open and subject to future acceptance by the County.)</p> <p>Dated <u>April 26, 1960</u> _____, Clerk of the Board of Supervisors</p> <p>By _____ Deputy</p>

Booqo Xarunta Shaqooyinka Degmada

5510 Overland Ave., San Diego, CA – 2nd Floor Cartographic Services. Waxaad ka raadin kartaa diiwaannada xafiisyada degmada waxaadna heli kartaa caawimaad. Waa lacag nuqullada aad kala baxayso bogga qariiradaha iyo naqshaduhu.

Agabka ikhtiyaariga ah oo kaa caawinaaya raadinta.

Hubi Warbixinta Sabar-loogadaada

Warbixinta Sabar-loogadaada ayaa ku jirta dukumiintigaaga markii aad iibsatay gurigaaga. Waxay sheegaysa qiimaynta kasta oo horey loogu sameeyay dhismaha waqtiga iibsiga. Haddii aad u baahan tahay warbixin cusub, shirkad kasta oo Sabar-loogo bixisa ayaa mid kuu abuuri karta. Waxaa laga yaabaa in lacag lagaaga qaado abuurista warbixin cusub. Waxyaabaha soo socda waa tusaalaha qaabka qiimaynta degmadu tahay marka lagu cadeeyo Warbixinta Sabar-loogada:

“...qiimaynta ujeedooyinka daadka awgood ayaa la sameeyay markay taariikhdu ahayd xx, sida ku cad Buuga_, Bogga_ee Diiwaannada Rasmiga ah oo ay samaysay Ismaamulka san diego kuna samaysay dhul banaan oo _ fiid ah balac ahaan kuna yaala waaxda...”

Shaqo Geli Ingineer ama Kormeere si uu Baaris U sameeyo

Waydii ururada ganacsiga sida Ururka Baareyaasha Dhulka (Land Surveyors Association) ama Laanta Ganacsiga Wanaagsan (Better Business Bureau) si ay kuugu qabtaan injineer xirfad u leh ama dhul baare.

Waad ku mahadsan tahay inaad doorkaaga ka qaadatay kahortaga daadka.

Haddii aad qabto su'aalo ah oo ku saabsan nidaamka daadka ee Degmadu maamusho, ama si aad u soo sheegto aagaga nidaamka Daadka degmadu maamusho oo u baahan dayactir, fadlan adeegso mid kamid ah khayraadka soo socda:

Foomka Codsiga Adeegga Oonleenkaha ah

www.sandiegocounty.gov/content/sdc/dpw/roads/Roads_Service_Request

Hadda Noogu Sheeg Abka

www.sandiegocounty.gov/content/sdc/dmpr/gfx/appcenter/index.html

Wac (858) 694-2212

